

# La talintaada aad la leedahay Bulshada NHS Farmashiistaha



Habraaceena wuxuu si dhow ula shaqaynayaa  
farmashiistayaasha deegaanka si ay kaaga  
taageeraan xaalado caafimaad oo fudud.

Waxaa laga yaabaa inay aad ugu habboon tahay in aad NHS-taada kala tashato farmashiistaha halkii aad kala tashan lahayd dhakhtarka GP-ga. Waxaad dooran kartaa farmashiye kugu habboon waxaanan kuu qabanqaabin doonaa tan.

Farmashiistayaasha waa khabiiriin ku takhasusay daawooyinka kuwaas oo ka taageeri kara walaacyo caafimaad oo kala duwan. Waxay na soo sheegi doonaan wixii ka dhacay goobta la talintaada, iyo haddii aad u baahan tahay ballamo dabagal ah.

## Waa maxay waxa dhacaaya marka xigta?



Waxaan u diri doonaa faahfaahintaada xiriirka iyo maclumaaadka ku saabsan xaaladaada farmashiyaha aad dooratay.



Farmashiistaha ayaa kula soo xiriiri doona si uu u habeeyo la-talintaada taas oo noqon doonta mid talefoon ahaan ah ama wicitaan muuqaal, ama waxaad tagi kartaa farmashiyaha.

La-talintu waxay ahaan doontaa mid qarsoodi ah – wax kasta oo aad ka hadashid waxaa loo xafidi doonaa sir ahaan.

Haddii aad booqato farmashiyaha, u sheeg shaqaalaha miiska si ay u ogaadaan inuu ku soo diray dhakhtarkaaga iyo inaad u timid la-talinta farmashiistaha. Dhammaan farmashiyeyasha waxay leeyihiiin qol la-talin oo qarsoodi ah.



## Sidee ayuu u caawin doonaa farmashiistaha?

Farmashiistayaashu waa xirfadlayaal daryeel caafimaad oo xirfad sare leh kuwaas oo ka siin kara talo caafimaad oo ku saabsan xaalado kala duwan oo fudud waxayna tababar ku soo qaateen daawooyinka ugu yaraan shan sano.

**Farmashiistaha ayaa dib u eegi doona astaamahaaga. Haddii ay u maleynayaan inaad u baahan tahay inaad la kulanto xirfadle daryeel caafimaad oo kale (sida Dhakhtar Guud (GP-ga) ama dhakhtarka indhaha), waxay kaa caawin doonaan inay tan qabanqaabiyaan.**



Farmashiistaha waxaa uu ku siin karaa talo caafimaad wuxuuna kaa caawin karaa inaad ogaato sida loo maareeyo xaaladdaada. Haddii ay u maleynayaan inay calaamadahaaga u baahan yihiin daawaynta, waxay kuu soo jeedin karaan daawo aad ka iibsan karto miiska (iyada oo aan rijeeto dhakhtar qorin).

**Farmashiistaha ayaa diiwaangelin doona wixii ka dhacay la-talintaada, oo ay ku jiraan daawo kasta oo lagu siiyay. Waxay nala wadaagi doonaan tan si loo xaqijiyo in diiwaankaaga caafimaad la cusboonaysiiyay.**



## Farmashigee ayaan la yeelan karaa la-talinta?



Waxaad dooran kartaa inaad la tashato farmashi kasta oo la heli karo oo bixiya adeegga.

## Sidee ayaan u isticmaali doonaa macluumaadkaaga?

Waxaan kaliya isticmaali doonaa macluumaadkaaga gaarka ah marka aan u baahanahay inaan daryeelkaaga u maareyno si ammaan ah.



## Halkee ayaan wax badan ka heli karaa?

Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah mareegaha soo socda:

[Sida farmashiye haagu u caawin karo \(www.nhs.uk\)](http://www.nhs.uk) Raadi farmashiye

